



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod. 39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 7aad	Kulanka: 9aad
Taariikhda: 24 Nofeembar, 2025	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 11:46 AM	Saacadda uu Xirmay: 12: 14 PM
Shir Guddoonka Fadhiga: Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi.	Guntanka Kulanka: 28 Senator
Martida Kulanka: Wasiiru-dowlaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS Mudane Saadaad Maxamed Nuur.	Ajendayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Qur'aanka Kariimka. 2. Ansixinta Ajendaha. 3. Akhrinta 3aad ee Hindise-sharciyeedka Dad- dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah.

Furitaanka Kulanka:

Senator Xuseen Maxamed Daahir ayaa akhriyey Aayadaha Quraanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajandayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajendaha kulanka, codaynta ayaa u dhacday sidaan:

Oggol: 28 Senator

Ka aamusay: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa u yeeray Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga Arrimaha Gudaha, Dib-u-heshiisiinta, Arrimaha Federaalka & Xiriirka DXDF, Senator Cabdiqani Ugaas Geelle Maxamed, si uu Golaha uga hor akhriyo Warbixinta Akhrinta 3aad ee Hindise-sharciyeedka Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah.

Warbixinta kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa cod geliyay ansixinta Hindise-sharciyeedka Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah, waxayna u dhacday sidan:

Oggol: 27 Senator

Ka aamusay: Majirin

Diidmo: Majirin

Ansixinta kaddib, Wasiiru-dowlaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta ayaa senatarada uga mahadceliyey ansixinta Hindise sharciyeedkaan.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajandayaasha kulanka.
2. ansixinta Hindise-sharciyeedka Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah.

Ugu dambayntii, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa kulanka soo xiray Sacadu markay ahayd **12: 14 PM.**

DHAMAAD